# Ku soo dhawoow soo saaridda PARENT PORTAL

PARENT PORTAL wuxuu kuu ogolaanayaa inaad hesho macluumaad ku saabsan ardaygaada **imaanshahiisa dugsiga**, **buundooyinkiisa**, **layliyadiisa** iyo **waxyaabo kale ee ku saabsan ilmahaaga**.

Si aad u isticmaasho PARENT PORTAL, waxaad u baahan tahay:

- **Iimeel shaqeeynaya** – iimeelkan waa inuu ka diiwaan gishan yahay dugsiga ilmahaaga.
    - Hadii aadan heysan iimeel, waxaad heli kartaa mid lacag la'aan ah.
- **Magacaaga oo u qoran sida uu ugu qoran yahay liiska ilmahaaga.**
    - Magacaaga iyo magaca awoowgaa waa inuu lamidyahay magaca ku qoran dugsiga ardaygaada. La xiriir dugsiga ardaygaada haddii rabto inaad hesho ama saxdo magacaaga.
- **Saddex walxaad oo lagu aqoonsan karo ilmahaaga:**
    1. Magaca ilmahaaga iyo magaca awoowgiis, sida uu ugu qoranyahay rikoorka dugsiga
    2. Lambarka aqoonsiga ee ilmahaaga (Tusaale: 34567; tan waxaa laga heli karaa jadwalka ardayga, oo ah kaar hore ama kaarka aqoonsiga ardayga)
    3. Dhalashada ilmahaaga, (*maalinta/bisha/sanadka*)

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan sidaad u ogaan lahayd macluumaad ku saabsan macluumaadka kaa yaala dugsiga, laxiriir dugsiga ardaygaaga. Markii aad hesho wax walba aad u baahantahay, aad website-ka dugsiga ilmahaaga, riix meesha ay ku qoran tahay PARENT PORTAL ama booqo: http://sisportal.mpls.k12.mn.us. Halkan fiiri haddii aad u baahantahay caawin ama macluumaad dheeraad ah: http://parentportal.mpls.k12.mn.us.

Haddii aad mar hore isdiiwaangelisay, geli magaca lagu galo iyo baaswoodka. Kadibna ku dhufo **SIGN IN**.

Haddii aadan isdiiwaangelinin, raac tallaabooyinka 1-4 ee hoos ku xusan:

**1**

Booqo http://sisportal.mpls.k12.mn.us. Ku dhufo **New User Registration**.



## 2

Aqri hesiiska kadibna ku dhufo **I Accept**.




## 3




1. Dooro magac gaar kuu ah. Magaca wuxuu u dhaxeenkaraa 1-30 xaraf (characters). Barnaamijka wuu ku ogeysiin doonaa haddaad isticmaashay magac qufkale uu leeyahay.
2. Magacaaga iyo kan awoowgaa waa inuu la mid ahaadaa waxa kuugu qoran dugsiga. La xiriir dugsiga haddii magacyada kala duwanyihiin.
3. Dooro baaswood oo ugu yaraan leh afar xaraf. baaswoodkaaga wuu kala yaqaanaa xarafaha har iyo kuwa wayn.
4. Gali macluumaadka lagaaga baahan yahay. Iimeelkaaga waa inuu la mid yahay midka kaa yaallo dugsiga canugaada. (La xiriir dugsiga haddii aad rabto in la cusbooney siiyo iimeelka.)
5. Ku dar macluumaad ku saabsan hal cunug. Dhalashada waa in looqoraa qaabka (maalin/bisha/sanadka). Hadii ay ilmo ka badan hal kuu dhigto dugsiyada dagmada, waxaad macluumaad kooda ku dari kartaa markaad samayo akawnt (account).
6. Ku dhufo **Save**.

- Haddii aad hesho farriin ka bilaabanaysa, "Save Successful – A confirmation key has been sent to your e-mail," qaad tillaabada ku xigta.
- Haddii aad hesho farriin sheegeysa inay wax khalad yihiin, iska sax khaladka, kadibna ku dhufo **Save**. Ma wadi kartid adiga oo aanan saxin khaladka.
  - Haddii uu magacaaga ama kan ilmahaaga leeyahay Jr. ama III (iyo wixii la mid ah) magacooda ka hor, ku qof meesha lagu qoro magaca awoowaha.
  - Haddii magacaaga ama kan canugaada leeyahay xarriijin (hyphen), isku day inaad ka saarto xarriijinta.
  - Haddii uu magacaada leeyahay hakad ('), uu u qoran yahay sida O'Malley, isku day inaad magaca u galiso hakad la'aan sida OMALLEY.
  - Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad la xiriirto dugsiga ilmahaaga si aad u xaqiijiso inay macluumaadka aad gelineyso iyo macluumaadka dugsiga kaa yaalla ay isku mid yihiin.

**4**

Ka raadi furaha xaqiijinta (confirmation key) iimeelkaada. Bagga PARENT PORTAL-ka ha furnaado. **Bag cusub**, fur iimeelkaada. Raadi farriin ay soo dirtay portal@mpls.k12.mn.us oo cinwaankiisa yahay **DISCOVERY PARENT PORTAL APPLICATION.**

- Karaadi iimeelka faylkaaga iimeellada iyo meelahakale sida JUNK-iga iyo SPAM-ka. Qufka kuu soo dira iimeelka waxaa laga yaabaa inuu ku diray JUNK-iga ama SPAM-ka.

Iimeelka wuxuu ku siindoonaa LINK aad ka gasho PARENT PORTAL-ka. Haddii aad xirto bagga PARENT PORTAL-ka, waxaad isticmaali kartaa http://sisportal.mpls.k12.mn.us.

**Isticmaal magaca iyo baaswoodka aad horay u sameeysay**. Gali furaha xaqiijinta (confirmation key) si aad u isticmaasho akowntiga cusub. Intaan wixii ka dambeeya, ma u baahan doontid inaad isticmaasho furaha xaqiijinta; waxaad u baahanaysaa oo kaliya magaca iyo baaswoodka.

Haddii aad hal arday ka badan diiwaangelisay, waa inaad ku dhufataa magaca ardayga. Haddii mid ka mid ah ilmahaaga uu qoranyahay mar ka badan, ku dhufo magaca ilmahaaga dugsiga ay hadda dhigtaan oo meesha ku qoran.

**Ku saabsan PARENT PORTAL:**

1. Bagyada waxay ku yaalaan dhanka bidix ee kombuyuutarka. Ku dhufo MENU-ga si aad u aragto macluumaadka ku qoran.
2. Haddii aad rabto inaad arday dheeraad ah ku darto, ku dhufo **Miscellaneous**. Waad arki doontaa ardayga aad ku dartay akawntiga iyo meel kale aad arday kale ku dari karto. Ku buuxi waxyaabaha lagaaga baahan yahay (Lambarka aqoonsiga ilmahaaga, magaca awoowe, magaca koowaad, taariikhda dhalashada) kadibna ku dhufo **Save.** Waxaad heli doontaa farriin markaad si saxan ugu darto ardayga.
3. Ku dhufo **My Students,** kuna laabo bagga.

## Xusuusnow: Markasta  ka bax (long out) bogga si aad u ilaaliso amaankaaada iyo kan ilmahaada!